



MOF/OM/050/2023

April 04, 2023

**Xeer-Nidaamiyaha Habka Loo gudbiyo Faafahinta Badeecadaha Furdooyinka
April, 2023**

Iyadoo la hoggaansamaayo Qodobka 28(g) ee **Sharciga Wax-ka-bedelka Sharciga Furdooyinka, 2020** (Sharci Lr.21 ee 5-tii Febraayo 2020), Wasiirka Maaliyadda waxaa uu halkaan kusoo saaraya “Xeer Nidaamiyaha Habka Loo-gudbiyo Faafahinta Badeecadaha Furdooyinka”, oo loogu talo galay in lagu nidaamiyo habka loo faahfaahinaayo badeecadaha ka soo dega amma ka dhoofa furdooyinka Soomaaliyeed.

QAYBTA 1AAD

Qodobka 1aad

Ujeeddada, Magaca iyo xiliga uu dhaqan-geleyo Xeer-Nidaamiyaha

- (1) Ujeedooyinka Xeer Nidaamiyaha waa kobcinta, wanaajinta iyo si wanaagsan u hirgelinta qodobadda ku jira Sharciga Canshuuraha Furdooyinka, Sh. Lr. 21, gaar ahaana qodabadiisa 43 iyo 44, oo qeexaya qaabka loo faahfaahinayo badeecadaha ka soo dega amma ka dhoofa dalka.
- (2) Xeer-Nidaamiyaha waxaa lagu magacaabaa “Xeer Nidaamiyaha Habka loo gudbiyo Faafahinta Badeecadaha Furdooyinka”.
- (3) Xeer-Nidaamiyahan waxaa uu dhaqan gelayaa taariikhda uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

**Qodobka 2aad
Fasiraadda**

Marka la joogo Xeer-Nidaamiyahan ereyadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa fasiraadda ku hor qoran::

- (1) “Awooda Maamul ee Furdooyinka” waxaa loola jeedaa hawlaha ay ka qabtaan Maamulka Furdooyinka gudaha dalka Soomaaliya amma dal kale si loo hubiyo fulinta sharciyada furdooyinka sida ugu haboon, waxaana ka mid noqon kara –

(b) baaritaanka alaabta;

- (j) hubinta xisaabaadka ballanqaadyada/waxqabadyadda (Accounts of undertakings) iyo diiwaanada kale;
- (x) kormeerka habka gaadiidka (Means of transport);
- (kh) kormeerka boorsooyinka iyo alaabada kale ee ay qaadaan amma wataan shaqsiyaadka; iyo
- (d) fulinta weydiimaha rasmiga ah; iyo
- (r) falal kale oo la midka ah ;
- (2) “Badeecada amma Alaab” waxa ay leedahay macnaha lagu sheegay Qodobka 1aad ee Sharciga Canshuuraha Furdooyinka 2020 (Sh. Lr. 21)
- (3) “Badeecadaha/alaabta kaydka ku -meelgaarka ah” waxaa loola jeedaa badeecadaha yimaada furdooyinka si loo soo dejiyo, ilaa lagu soo daayo awooda Maamul ee Furdooyinka si waafaqsan Sharciga Canshuuraha Furdooyinka;
- (4) “Caddeeye amma faahfaahiye” waxaa loola jeedaa qofka faahfaahinaaya badeecadaha mara furdooyinka” isaga oo isticmaalaya magaciisa amma qofka magaciisa lagu caddeeyey faahfaahinta furdooyinka;
- (5) “Dallaalka furdooyinka (Brokers)” waxaa loola jeedaa dallaal furdo oo haysta shati dalaal furdo.
- (6) “Dekad shisheeye” waxaa loola jeedaa deked ka baxsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
- (7) “Faahfaahinta badeecadaha in la dhoofiyo la rabo” waxaa loola jeedaa faahfaahinta badeecadaha dhoofaaya sida laga doonaayo qof walba oo alaab dhoofinaaya iyada oo lagu caddaynaayo qaabka lagu qeexay Qeybta II iyo III ee Xeer-nidaamiyahaan,
- (8) “Faahfaahinta Badeecadaha mara Furdooyinka (Customs Declaration)” waxaa loola jeedaa qaab faahfaahineed kasta oo lagu soo saaray Xeer-Nidaamiyahan, faahfaahin kasta oo noocaas ahna waxa ay noqon doontaa qaabka loo gudbiyo faahfaahinta badeecadaha oo waafaqsan Shuruucda Furdooyinka;
- (9) “Faahfaahinta badeecadaha soo dega” waxaa loola jeedaa qaab walba oo laga dheehan karo faahfaahinta badeecadaha/Alaabta imaaneysa amma soo dageysa iyada oo lagu cadeynaayo cidda codsiga samaynaysa, lana waafajinayo nidaamka iyo xeerarka alaab soo dejinta, sida lagu qeexay Qeybta III, ee Xeer-nidaamiyahaan;
- (9)“Furdo” waxaa loola jeedaa Waaxda Furdooyinka oo loo asaasay si waafaqsan Qodobka 3aad ee Sharciga Wax-ka-bedelka Sharciga Furdooyinka 2020 (Sh. Lr. 21);

- (10) "Kormeerka Furdooyinka" waxaa loola jeedaa tallaabooyinka ay qaadeen maamulka furdooyinka si loo hubiyo fulinta Shuruucda Furdooyinka;
- (11) "Dukumiintiyada Xoojinta" waxaa loola jeedaa dukumintiyada taageeraaya soo dajinta alaabaha badeecooyinka ee furdooyinka islamarkaana qeexaya macluumaadka iyo xogta lagu bixiyey cadeynta alaabaha ee furdooyinka.
- (12) "Madaxa Furdo" waxaa loola jeedaa qofka haaya jagada ugu sareeysa ee goob furdo ah oo loo igmaday mas'uuliyadda hawlaha ka socota goobtaas, kana masuul ah ka dhaqangelinta shuruucda furdooyinka goobtaas;
- (13) "Sarkaalka ugu habboon" wuxuu leeyahay macnaha lagu sheegay Qodobka 1aad ee Sharciga Wax-ka-bedelka Sharciga Furdooyinka 2020;
- (14) "Sharciga Wax-ka-bedelka Sharciga Furdooyinka 2020" waxaa loola jeedaa Sharciga Wax-ka-bedelka Sharciga Furdooyinka, ee Sharci Lambar 21, ee soo baxay, 5tii Febraayo, 2020.
- (15) "Sharciga Maamulka Dakhliga" waxaa loola jeedaa Sharciga Maamulka Dakhliga, ee Sharci Lambar 13, ee soo baxay 21 Oktoobar 2019;
- (16) "Shuruucda Furdooyinka" waxay leeyihiin macnaha lagu sheegay Qodobka 1aad ee Sharciga Wax-ka-bedelka Sharciga Furdooyinka 2020, waxaana ku jira sicirka/tariifada furdooyinka;
- (17) "Usoo -bandhigidda badeecadaha mamaulka furdooyinka" waxaa loola jeedaa ogeysiinta loo sameeyo furdada, iyadoo la raacayo qaabkii loo jideeyay usoo bandhigidda xafiiska furdada ama meel kasta oo furdo u cayintay ama oggolaatay imaanshaha badeecadaha.

Qodobka 3aad
Ansixinta foomamka

- (1) Madaxa Furdada wuxuu oggolaan karaa foomka lagu cadeeyay sharciga furdooyinka iyo Xeer-nidaamiyayaasha, kuwasoo warqad ama elektaroonik ah.
- (2) Foomka la oggolaaday waa in lagu daabaco mareegaha (website) Furdooyinka ama la heli karaa, isagoo daabacan, oo lacag la'aan ah.
- (3) Madaxa Waaxda Furdooyinka waa inuu soo saaraa oo cusboonaysiiyaa tilmaamaha, lagu daabacay mareegaha Furdooyinka, kaas oo qeexaya sida foom kasta oo la ansixiyey loo buuxinayo.



QAYBTA II

KA WARBIXINTA ALAABAHA/BADEECOYINKA SOO GALAYA DALKA

Qodobka 4

Faahfaahinta Kooban - Imaanshaha Diyaaradaha, Maraakiibta iyo Baabuurta

- (1) Badeecadaha la keeno Soomaaliya waa in si kooban loo faahfaahiyaa.
- (2) Wadaha diyaarad, markab ama gaari ka soo gudbaya goob furdo ah ama ka imaanaya meel ka baxsan Soomaaliya waa inuu u gudbiyaa sarkaalka u idman goob furdo faahfaahin kooban oo ku saabsan badeecada.

Qodobka 5

Foomka caddaynta kooban

- (1) Caddayn kasta oo kooban oo waafaqsan Qodobka 3aad waa:
 - (a) Inuu ahaadaa foomka uu oggolaaday Madaxa Waaxda Furdooyinka;
 - (b) Inuu sidaa macluumaadka foomka la oggolaaday; iyo
 - (c) In lagu saxiixaa habka lagu tilmaamay foomka la oggolaaday.
- (2) Caddaynta kooban waxaa loo gudbin karaa qaab daabacan ama si elektaroonik ah (si danabeysan).
- (3) Madaxa Waaxda Furdooyinka wuxuu go'aamin karaa oo ansixin karaa nidaamka danabeysan ee lagu xareeyn karo caddeynta kooban.
- (4) Maamulka Sare ee Furdooyinka wuxuu go'aamin karaa in caddaynta kooban lagu soo gudbiyo si danabeysan oo keliya, kadib markii arrinkaas ogeysiis ahaan loogu daabaco Faafinta Rasmiga iyo mareegta (website) Furdooyinka.
- (5) Marka caddaynta kooban lagu soo gudbiyo si danabeysan, sarkaalka furdo waxa uu dalban karaa iyada oo daabacan haddii uu u baahdo muddo 72 saacadood gudahood ah.



Qodobka 6

Imaanshaha laba furdo amma ka badan

Marka ay diyaarad amma markab ka soo degto/xirto in ka badan hal goob furdo oo Soomaaliya ah, waa in goob kasta loo sameeyaa caddayn kooban oo u gaar ah.

Qodobka 7

Diyaaradaha iyo maraakiibta aan wadin xamuul “ballast”¹

Diyaarad amma markab aan wadin wax xamuul ah oo imaanaya Soomaaliya waa in loo aqoonsadaa faaruq “ballast”.

Qodobka 8

Xamuulka ku haraya diyaaradaha iyo maraakiibta

Xamuulka ku haraya diyaaradda ama markabka waa in la caddeeyaa iyadoo la adeegsanayo foomka la oggolaaday.

Qodobka 9

Diiwaangelinta & Ogolaanshaha Caddeynta Kooban

Furdooyinku waa in ay diiwaangeliyaan caddeymaha kooban sida ku cad Qodobka 4aad waana iney siiyaan lambar tixraac u gaar ah caddeyn walba.

Qodobka 10

Wax -ka -beddelka caddaynta kooban

- (1) Diiwaangelinta kadib, cadeeyuhu wuxuu ka codsan karaa sarkaalka u idmann goob furdo inuu wax ka bedelo caddaynta kooban, isagoo sheegaya sababaha wax -ka -beddelka keenay.
- (2) Caddaynta kooban ayaa wax laga beddeli karaa oo keliya haddii sarkaalka goob furdo u arko inay jiraan sababo macquul ah oo keeni kara wax -ka -beddelka, si loo hubiyo in caddeyntu tahay mid saxan oo dhammaystiran.

Qodobka 11

Koontaroolka Kastamka

- (1) Badeecadaha laga rabo caddeynta kooban waxay marayaan koontaroolka furdooyinka.
- (2) Sarkaalka goob furdo wuxuu baari karaa alaab kasta oo maraysa koontaroolka furdooyinka.



¹ Ballast is extra weight added to a ship when it unloads its cargo (Culees-celin)

- (3) Sarkaalka goob furdo wuxuu geli kara diyaarad, markab ama baabuur, si uu u sameeyo baaris.
- (4) Shaqaalaha diyaarad ama markab, waa inay siiyaan dhammaan kaalmada suurtagalka ah saraakiisha goob furdo ee ku howlan baarista diyaaradda ama markabka.
- (5) Darawalka baabuurka waa inuu siiyaa dhammaan kaalmooyinka suurtagalka ah saraakiisha goob furdo ee ku howlan baarista.
- (6) Marka lagu daro awoodaha ku xusan xeerkan, sarkaalka goob furdo wuxuu adeegsan karaa awood kasta oo dheeraad ah oo ay siiyaan sharciyada Dakhliga iyo Furdooyinka ee la xiriira badeecadaha mara kontaroolka furdooyinka.

Qodobka 12
Dejinta Alaabta

- (1) Ka dib marka la diiwaangeliyo caddeynta kooban, keliya ogolaanshaha sarkaalka goob furdo ayaa lagu dejinayaa alaabta saran diyaaradda ama markabka.
- (2) Si kastaba ha ahaatee, oggolaanshaha noocaas ah looma baahna haddii ay jirto khatar ku soo fool leh dadka ama badeecadaha u baahan in si degdeg ah loo dejiyo dhammaan ama qayb ka mid ah alaabta.
- (3) Marka alaabta la dejiyo ruqsad la'aan sida ku cad faqradda (2), sarkaalka goob furdo waa in sida ugu dhaqsaha badan loogu wargeliyo.
- (4) Sarkaalka goob furdo wuxuu amri karaa dejinta iyo furida alaabta / badeecadaha iyadoo la fulinayo ujeedooyinka kormeerka iyo barista.
- (5) Alaabta/badeecada lagama qaadi karo goobteedii hore iyada oo aan fasax laga haysan sarkaalka goob furdo.

Qodobka 13
Kaydinta Ku-meelgaarka ah ee Alaabta

- (1) Badeecadaha sida ku-meel-gaadhka ah loo keydiyo waa in lagu keydiyaa goobta loo asteeyay iyadoo la raacayo shuruudaha u degan furdooyinka.
- (2) Badeecadaha ku jira kaydinta ku-meel-gaarka ah waa in dejintooda loo maareeyaa sida ugu haboon, uguna badqabsan islamarkaana aan wax ka bedeleyn muuqaalka iyo sifooyinka farsamo ee alaabta.
- (3) Milkiilaha alaabta sida ku-meelgaarka ah loo keydiyay waxa uu kormeeri karaa alaabta, kana qaadi karaa muunad, kadib markuu fuliyo waqtiga iyo sharuudaha la cayimay inta uusan sameyn cadeeynta ku cad Qeybta III.

Qodobka 14
Muddada habraaca furdooyinka

Marka alaabta laga gudbiyo caddeynta kooban, sida ku xusan habraaca soo dejinta alaabta ee ku xusan Qaybta III, waa inuu cadeeyuhu bilaabaa soo dejinta alaabta inta u dhaxeesa muddo –

- (a) [14 maalmood] laga bilaabo taariikhda caddaynta kooban lagu sameeyay badeecadaha ku yimaada badda; ama
- (b) [10 maalmood] laga bilaabo taariikhda caddaynta kooban laga gudbiyay badeecadaha aan ku imaan badda.

Qodobka 15
Ka saaridda alaabta Kaydka Ku -meelgaarka ah

Haddii soo-dejiyaha badeecada sida ku-meel-gaadhka ah loo keydiyay uu ku guul dareeysto inuu bilaabo habraaca soodejinta badeecadda mudada ku qeexan Qodobka 13aad ee maamulka furdada waxa uu xaraashayaa alaabtaas sida waafaqsan qodobka 13aad ee maamulka furdooyinka waxa ay ka saaraayaan alabtaasi keydka, iyadoo xaraashaya si waafaqsan xeerarka loo sameeyay ujeedadaas

QAYBTA III – CADDEYNTA ALAABAHA / BADEECADAHA SOO DEGA

Qodobka 16
Cadeeynta Waxyaabaha Soo Dega

Dhammaan badeecadaha ku jira kaydinta ku-meel-gaarka ah ee loogu talagalay in ay gudaha u galaan Soomaaliya, waa inuu cadeeyaa qof ku qeexan Qodobka 20aad iyadoo loogu gudbinayo furdooyinka qaabka caddeynta alaabta soo degta.

Qodobka 17
Foomka iyo nuxurka caddaynta

Caddayn kasta ee badeecad soo dageeysa sida uu farayo Qodobska 16aad-

- (a) waa inuu ahaadaa foomka uu oggolaaday Madaxa Furdooyinka;
- (b) waa in ay ku qoran yahiiin macluumaadka looga baahan yahay; iyo
- (c) loona saxiixaa habka lagu tilmaamay foomka la oggolaaday.

[Handwritten signature]

Qodobka 18
Caddaynta Danabeysan (elektarooniga ah)

- (1) Caddaynta alaabta soo degta waxaa loo gudbin karaa si danabeysan (elektaroonig ahaan), iyadoo la raacayo sistemka iyo hannaan uu oggolaaday Madaxa Furdooyinka.
- (2) Marka caddaynta loo gudbiyo qaab danabeysan si waafaqsan farqadda 1aad, sarkaalka goob furdo wuxuu cadeeyaha ka dalban karaa inuu soo gudbiyo ayadoo qoraal daabacan waqtiga uu sarkaalka u qabto.
- (3) Qoraalka daabacan ee loo gudbiyey sida ku qeexan farqada 2aad waa inuu saxiixaa cadeeyaha.

Qodobka 19
Dukumiintiyada Xoojinta

- (1) Dukumiintiyada xoojinta ee laga gudbinayo caddeymaha furdo waa inuu sitaa caddeeyaha islamarkaasna uu baari kara sarkaalka goob furdo xilliga caddeymaha alaabta la gudbinaayo.
- (2) Dukumiintiyada xoojinta ahi waa in la siiyaa sarkaalka goob furdo ee gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan sharciga furdooyinka.

Qodobka 20
Gudbinta Cadeynta Furdo

- (1) Caddaynta alaabta soo degta waa inuu gudbiyaa soo-dejiyaha ama dallaal kastam oo ka wakiil ah soo-dejiyaha.
- (2) Qofka soo gudbinaya cadeymaha alaabta waa inuu :-
 - (a) Bandhigi karo una gudbin karo furdada badeecadaha la cadeeyay; islamarkaasna
 - (b) Bixin karo dhammaan macluumaadka lagama maarmaanka ah ee khuseeya alaabta.
- (3) Caddeeyaha alaabta waa inuu ka diiwaangashan yahay furadooyinka sida waafaqsan sharuudca dalka ee keenista alaabta dalka Soomaaliya.



Qodobka 21
Gudbinta Caddaymaha Alaabta aan weli imaan

- (1) Caddayn Alaab waa loo gudbin karaa furdada ka hor inta aysan alaabtu imaan Soomaaliya.
- (2) Haddii eysan alaabta ku imaan muddo 30 maalmood gudahood oo ka bilaabaneyso markii cadeynteeda la gudbiyay, furdadu waxa ay u aqoonsan kartaa mid aan horey loosoo gudbin.

Qodobka 22
Ogolaashaha Caddeymaha Furdooyinka iyo Taariikhda soo Dejinta

- (1) Caddayta soo dejinta ee furdooyinka –
 - (a) kaas oo waafaqsan shuruudaha ku jira Qaybtan; iyo
 - (b) Islamarkaana si saxan alaabta loogu soo gudbiyo furdada,

Furdooyinku waa in ay degdeg ku aqbalaan.

- (2) Furdadu waa inay soo saaraan lambar tixraac oo u gaar ah caddeynta loo ogolaaday si waafaqsan farqadda (1).
- (3) Taariikhda ogolaanshaha caddaynta soo-dejinta ee furdada, waa taariikhda imaanshaha alaabta ee gudaha Soomaaliya, (marka laga reebo qeexitaan meel kale lagu qeexay) taariikhdaasi ayaana loo isticmaali doonaa fulinta arrimaha la xiriira habraaca furdada iyo cadadka canshuureed ee ku waajibay alaabta.

Qodobka 23
Wax ka beddelka caddeynta alaabta soo degta

- (1) Ka dib marka la aqbalo caddeynta soo dejinta alaabta, isagoo sababeynaya caddeeyuhu wuxuu sarkaalka goob furdo ka codsan karaa inuu in loo ogolaado bedelidda qeybo ka mid ah caddeynta.
- (2) Wax ka beddelka xeerkani lagu sheegay ma ogolaaneyso wax ka beddel dhalin kara kusoo darid alaab dheeraad ah oo aan caddeynta asalka lagu soo gudbin.
- (3) Wax ka beddelka xeerkani lama aqbalayo kadib –
 - (a) Marka ay furdadu ogeysiiso caddeeyaha inay baarayaan alaabta;
 - (b) Ka hor hubinta la xiriirta arrinka lagu tilmaamay faqradda (a);



- (c) Marka furdada caddeeyso in qeyb ka mid ah xogta lagasoo gudbiyay caddeynta aysan saxneyn; ama
- (d) Kadib marka furdada fasaxdo alaabta.

Qodobka 24

Joojinta Caddeynta

- (1) Sarkaalka goob furdo waa inuu joojiyaa caddeyn la ogolaaday kadib marka uu cadeeyuhu ogolaado hadii-
 - (a) cadeeyuhu sheego khaladaad ka hor imaanaya habraaca soo dejinta alaabta ee furdooyinka; ama
 - (b) duruufo khaas ah awgood, badeecadaas aan la keeneyn Soomaaliya.

- (2) Ka noqoshada hoos timaada xeerkan lama aqbalayo –

- (a) Kadib marka ay furdada ogeysiiso caddeeyaha inay baarayaan alaabta;
- (b) Ka hor hubinta la xiriirta arrinka lagu tilmaamay faqradda (a);
- (c) Kadib marka furdada caddeeyso in qeyb ka mid ah xogta lagasoo gudbiyay caddeynta aysan saxneyn; ama
- (d) Kadib marka furdada fasaxdo alaabta.

Qodobka 25

Awoodaha Hubinta Caddeymaha

- (1) Si loo hubiyo saxnaanta iyo dhameystirnaanta caddeynta alaabta ee loo gudbiyay furdada, sarkaalka goob furdo –
 - (a) Waxa uu baari karaa dukumiintiyada xoojinaya caddeynta iyo warqadaha kale ee la socda; ama
 - (b) Waxa uu caddeeyaha ka dalban karaa, duruufo khaas ah awgood, in badeecada mar dambe loo soo dhoofin doonin Soomaaliya.
 - (c) Wuxuu baari karaa alaabta, kana qaadi karaa muunada si loo taxliiliyo ama baaritan xeeldheer lagu sameeyo.



Qodobka 26
Gaadiidka Alaabta Baadhitaanka

- (1) Caddeeyaha ayaa qabanqaabinaya, diyaarinaya islamarkaasna ka mas'uul ah –
 - (a) in alaabta la geeyo meesha lagu baarayo ama muunada lagu qaadayo;
 - (b) qaadidda loo baahdo si loo baaro ama qaadista muunada.
- (2) Kharash kasta oo ka yimaada arimaha ku xusan farqada (1) waxaa masuuliyadiisa leh ama bixinaaya caddeeyaha.
- (3) Caddeeyuhu waa inuu agjoogaa baarista alaabta iyo qaadista muunada.
- (4) Sarkaalka goob furdo waxa uu caddeeyaha ama wakiilkiisa ka dalban karaa inay joogaan waqtiga baarista alaabta ama qaadista muunada, si ay uga caawiyaan fududeynta baarista iyo qaadista muunada.
- (5) Furdadu mas'uul kama aha bixinta magdhaw kasta oo la xiriira baarista ama qaadista muunada ee loo raacay si waafaqsan xeerkan.
- (6) Furdada ayaa bixineysa kharashaadka la xiriira taxliilinta, baarista alaabta iyo qaadista muunada.

Qodobka 27
Baaris Qeybeed

- (1) Marka la baarayo qayb ka mid ah alaabta ku jira caddaynta lasoo gudbiyay, natiijooyinka baarista waxaa lagu dabaqayaa dhammaan alaabaha ku xusan Caddeynta.
- (2) Si kastaba ha ahaatee, caddeeyuhu wuxuu codsan karaa baaritaan dheeraad ah haddii uu u arko in natiijada baaris qeybeedku ku saxneyn alaabta inteeda kale.
- (3) Ujeedooyinka farqadda (1), marka ay caddaynta soo dejintu ka kooban tahay hal ama wax ka badan oo alaab ah, faahfaahinta la xiriirta shay kasta waxaa loo dhigayaa iney leedahay caddeyn u gaar ah.



Qodobka 28
Adeegsiga Natiijooyinka Xaqiijinta Caddeynta

- (1) Haddii Furdadu xaqiijiso caddeyn iyada oo loo marayo baaritaan ama muunadeyn, natiijooyinka caddaynta la xaqiijiyay waxaa loo adeegsanayaa ujeedooyinka fulinta sharciyada furdooyinka.
- (2) Marka aysan furdadu xaqiijin caddeynta, faahfaahinta ku xusan caddeynta waxaa loo adeegsanayaa ujeedooyinka fulinta sharciyada furdooyinka.

Qodobka 29
Qiimaynta, Ogaysiinta & Bixinta Canshuurta

- (1) Xaddiga canshuurta la bixinayo waxaa go'aaminaya, qiimeynayana furdooyinka, isla marka ay helaan xogta lagama maarmaanka ah.
- (2) Qiimaynta ku cad faqradda (1) waa qiimaynta lagu qeexay farqadda 2 (1) (c) ee Jadwalka Labaad ee Sharciga Maamulka Dakhliga.
- (3) Qiimaynta ka dib, furdadu waa in ay isla markiiba ku wargeliyaan caddeeyaha alaabta qaddarka canshuureed ee waajibtay, sida ku cad qodobka 49aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga.
- (4) Ujeedooyinka Qodobka 51aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, caddeeyuhu waa inuu ku bixiyaa canshuurta waajibtay muddada la cayimay gudahood laga bilaabo taariikhda ogeysiinta ee ku xusan faqradda (3).

Qodobka 30
Siideynta alaabta

- (1) Haddii –
 - (a) Shuruudaha marinta alaabada ee habraacyada furdooyinka la buuxiyo / fuliyo; islamarkaasna
 - (b) Alaabtu aysan aheyn alaab la mamnuucay ama xaddiday soo gelitaankeeda; islamarkaasna
 - (c) Faahfaahinta ku jirta foomka caddeynta alaabta la xaqiijiyay ama la aqbalay xaqiijin la'aan; islamarkaasna
 - (d) Canshuurta waajibtay iyo wixii kale ee lagu leeyahay la bixiyo,

Furdadu waa inay si degdeg ah u sii deysaa alaabta.

- (2) Dhammaan badeecadaha ku wada jira hal foom oo caddeyn ah waa in la wada daayaa hal waqti.

Qodobka 31

Baaritaanada ka dambeeya sii deynta alaabta

- (1) Sarkaalka goob furdo, isagoo sii hubinaya saxnaanta caddeymaha ama macluumaadka la xiriira alaabta, wuxuu baaritaan ku samayn karaa alaabta la sii daayay isagoo adeegsanaya awoodaha ku qeexan Madaxa III ee Qaybta V ee Sharciga Maamulka Dakhliga ujeeddadiisuna tahay baaris –
- (a) dukumiintiyada ganacsiga iyo xogta la xiriirta keened iyo dhoofin alaab lagu gudbiyay foomka caddeynta; ama
- (b) hawlgallada ganacsi ee xiga ee la xiriira alaabtaas.
- (2) Sarkaalka goob furdo ayaa sidoo kale baari kara alaabta haddii ay weli suurtagal tahay in la soo saaro (ama la sii warshadeeyo).
- (3) Haddii baaritaanka alaabta ee sii deynta ka dib uu muujiyo xaqiijinta ama aqbalaadda in lagu saleeyay macluumaad aan sax ahayn ama aan dhammaystirnayn, furdadu –
- (a) waxay qaadi kartaa tallaabooyin lagu go'aaminayo canshuurta saxda ah ee waajibtay iyadoo la raacayo macluumaadka cusub ee la heli karo;
- (b) Waana in ay soo saartaa qiimeyn dheeri ah si loo dhameystiro qaddarta canshuureed saxda ah.
- (4) Qiimaynta dheeraadka ah ee lagu qeexay farqadda (3) waxay noqoneysaa qiimayn wax ka bedel lagu sameeyay si waafaqsan ujeedooyinka Sharciga Maamulka Dakhliga islamarkaasna canshuurta dheeraadka ah waxaa la bixinayaa, laguna soo celinayaa si waafaqsan isla sharcigaas.

QAYBTA 4AAD

DHOOFIN

**Qodobka 32
Dhoofinta alaabta**

Qaabka gudbinta foomka caddeymaha ee badeecadaha laga dhoofinayo Soomaaliya, badeecadahaas iyo habraacyadoodaba waxaa loo raacayaa Qaybta II iyo III iyadoo la firinaayo hadba xaalka sida uu yahay (*mutatis mutandis ama leh isbadello muhiim ah*).

Wada Shaqayn Wacan,

[Handwritten signature]
04/04/2022

Dr. Cilmi Maxamuud Nuur
Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

